



**Buug-yaraha
Bukaanka**

Tusmoojinka

- 03 Hordhaca
- 04 Cidee Ayaan Nahay
- 05 Wacyigelinta
- 06 Balamaha
- 08 Adeegyada Degdega
- 09 Caymiska
- 10 Lacag bixinta
- 11 Barnaamijka Dhimista
Qidmada Buuxinta
Baahiyada
- 12 Bogga Bukaanka
- 13 Qoraalada / Gudbinada
- 14 Sheybaarada
Baaritaanada
- 15 Xusuus qor
- 02

Meesha Sadler Health Center,
hadafkeena waa kugu caawinta
gaaritaanka noloshaada caafimaadan
oo dhinaca helitaanka daryeel tayo
leh.

Waxaan bixinaa taageerada xirfadle u
qalmo oo qaata waqtiga ku baranayo
adiga iyo baahiyadaada caafimaad.

Sida xaruntaada daryeelka,
kooxdeena waxay halkaan u joogaan
inay ka jawaabaan su'aalahaaga.
Waxaan sidoo kale kugu caawin
karaa inaan kugu xiro illaha iyo
taageerada.

Buug-yarahaan Bukaanka wuxuu
u edeegaa sida hagaha loogu
jawaabayo su'aalahaaga ku saabsan
waxa loo filanayo sida bukaanka
Sadler Health Center, ka bilow
sameynta balanta ugu horeyso
oo lagu codsanayo diiwaanada
caafimaadka.

**H Ku dhaji hagahaan
farantijeerkaaga, la hayso
diiwaanadaada caafimaad,
ama ka gal onleenka
xili walba ee
SadlerHealth.org.**



Waa kuma Sadler Health Center?

Sadler Health Center waa Xarun Caafimaad oo Faderaal ahaan U qalantay. U adeegeyso bukaanada adiga oo kale, waxaan ka dhignaa caafimaadka bulshadeena muhiimka wax walba oo aan sameyno. Waxaa la aasaasay 1980s sida Sadler Caring Center, waxaan siinaya daryeelka koowaad ee la heli karo, caafimaadka dabeecada iyo adeegyada ilkaha shaqasiyaadka caymisan, aan caymisneyn iyo shaqsiyaadka aan caymiska haysan oo labo goobood ah: Gobolka Carlisle iyo Perry. Howlgalkeena waa hormarinta caafimaadka bulshadeena iyada oo la bixinayo daryeel isku dhafan, tayo sareeyo iyo daryeel naxariis leh.

Daryeelka Caafimaadka koowaad ee Qoyska

Daryeelka ka hortaga oo dhameystiran, oo ay ku jiraan baariitaanada jirka sannadlahaa iyo joogtada ah, tallaalada,baaritaanada TB-da,baaritaanada sheybaarka, gudbinada Raajooyinka,baariraanada cudurada, ka hortaga uurka iyo booqashoooyinka jirada oo dhammaan bukaanada diiwaangashan.

Daryeelka Koowaad ee Carruurta

Daryeelka ilmaha, socod baradka iyo qaangaarka, inaga oo bixineyno baaritaanada jirka, tallaalada iyo baaritaanada fayo qabka, sidoo kale sida waxbarashada iyo jaheynta ee arimaha caafimaadka carruurta la xirierto.

Daryeelka Ilkaha

Daaweynta degdega iyo soo kabsiga, oo ay ku jiraan nadiifinada joogtada ah, buuxinada, iyo qaliinada yaryar.

Caafimaadka Dabeeecada

Maamulida walbahaarka, murugada, balwadaha, dabeeecadaha ama walaacyada dareenka oo adiga ku dhibayo waana saameynayo caafimaadkaaga. Adeegyada waxaa loo heli karaa bukaanada ka mid ah xarunta caafimaadka sida ka qeyb ah adeegyadeena daryeelka isku dhafan.

Daaweynta La talinta La jirto (MAT)

Daaweynta La talinta La jirto (MAT) oo loogu talogalay shaqsiyaadka rabaan inay ka xuroobaan la qabsiga daawooyinka. Aastaamaha ka laabashada bogsashada iyo xaraarada cilmi nafsiga.

Joojinta Tubaakada

La talinta shaqsiga iyo kooxda iyo qalabyada kugu caawinayo u joojinta tubaakada si qarsoodi ah oo toos ah.

Barnaamija HealthyRx

Daawada qarashka hooseeyo iyo caawinta daawooyinka, oo ay ku jiraan gudbinada bixiyayaasha daryeelka la gaareeyay ee deegaanka iyo adeegyada taageerada.

Baaritaanada HIV/AIDS & STD

Wacyigelinta, la talinta, illaha baaritaanada iyo waxbarashada.



Sidee ayaan balan u sameeyaa?

U yeer leenkeena balanta ee 717-960-4393 wixii Caafimaadka iyo Ilkaha 717-960-4394 oo Ilkaha. Wacitaankaaga waxaa looga jawaabayaa qaabka in la helay. Ama, imaw xafiiskeena oo la hadal soo dhaweynteenaa ee xafiiska hore.

Miyaa la i arki karaa aniga oo markaas imaaday?

Shaqsyaadka waxaa la arki karaa balanta isla maalintaas ah sida la heli karo. U yeer leenkeena balanta ee 717-960-4393 wixii Caafimaadka iyo Ilkaha 717-960-4394 oo Ilkaha. Bukaanada waxaa lagu dhiirogelinaya inay soo wacaan inta u dhaxeyso 8 a.m. iyo 9 a.m. si ay u fiiriyaan helitaanka.

Balamaha isla maalinta waa qofkii soo hormaro, ayaa la hormarinaya. Shaqsyaadka raadinayo balanta imaanshaha waxaa lagu daray liiska sugitaanka dhaqtarka. Wuxaan ku dadaaleynaa inaan aragno bukaanadaan inta lagu jiro furitaanka ugu horeeyo ee la heli karo, laakin ma damaanad qaado balanta isla maalinta.

Sidee ayaan ku ogaan karaa wax ku saabsan xiritaanada cimilada la xiriirto?

Dhacdada cimilada xun, bukaanada waxaa lagula talinaya inay fiiriyaan saldhigiyada aqbaaraha deegaanka iyo websaydka Sadler Health Center oo warbixinta xiritaanka ee www.SadlerHealth.org. Bukaanada leh balamaha jadwaleysan waxaa lagu soo ogeysiinaya sida ugu dhaqsiha badan ee suurtogalka ah ee xiritaanka iyada oo la isticmaalayo qaababka xiriirka la doorbiday.



Sidee ayaan u joojiyaa balan?

Ka soo wac xafiiskeena ee 717-960-4393 wixii Caafimaadka ama 717-960-4394 oo Ilkaha si aad ula hadashadid soo dhaweynta. Wuxaan weydiinay bukaanadaas inay wacaan 24 saac ka hor waqtiga ama sida ugu dhaqsiha badan ee suurtogalka ah.

Sidee ayaan ku ogaanayaa cida bixiyaheyga yahay?

Bukaanada waxaa loo xilsaaray bixiye waqtiga diiwaangelinta. Wuxaad ka geli kartaa warbixintaan xili walba dhinaca bogga Bukaanka. (Fiiri bogga 12 wixii warbixin dheeraad ah ee gelitaanka Bogga Bukaanka)

Maxaan uga baahannahay balanteyda?

- Kaarka (kaararka) caymiska
- Aqoonsiga Sawirka
- Cadeynta daqliga (Looga baahanyahay balanta hore kaliya)
- Warqad walba ee u baahan in la buuxiyo, oo ay ku jiraan foomamka jirka, foomamka Aflac iyo foomamka WIC
- Liiska daawooyinka hadeer, oo ay ku jiraan daawooyinka dukaanka laga iibsado iyo dheeraadyada



Ma bixisaan turjubaan?

Haa. Adeegyada fasiraada waxaa lagu heli karaa luuqado badan oo dhinaca leenka fasiraada luuqada.

Ma haysataa helitaanka gaariga tarooliga?

Haa. Xarunteena waa cabashada ADA.

Adeegyadee gurmadka ayaa la heli karaa?

Haddii aad qabtid gurmad, halka ilbiriqsiyo la xisaabiyo, fadlan soo wac 911 ama booqo qolkaaga degdega ku xigga.

Balamaha isla maalinta waxaa laga heli karaa aasaas xadidan. U yeer leenkeena balanta ee 717-960-4393 wixii Caafimaadka iyo Ilkaha 717-960-4394 oo Ilkaha. Bukaanada waxaa lagu dhiirogelinaya inay soo wacaan inta u dhaxeyso 8 a.m. iyo 9 a.m. si ay u fiiriyaan helitaanka.

Dhacdada xaaladaha degdega iyada oo aad halkaan u joogtid balantaada jadwaleysan, shaqaalaheena way u tababaranyihii inay u jawaabaan iyo kugu xiriiriyaan adeegyada gurmadka deegaanka.

Maleedahay wax baahi ah xiliyada shaqada kadib?

Hadii ay ku heleesho arrin degdeg ah xiliyada shaqada kadib, waxaad soo wici kartaa lambarkeena ugu wayn ee 717-218-6670 si laguu caawiyo. Kalkaaliyaasheena shaqeeya xiliyada shaqada kadib waxey la xiriiri karaan adeeg bixiyaha markii lasoo waco, waxey kuugu aadinayan qolka xaaladaha degdega ah, ama waxay kusiinayan jijo kale taas oo ku xiran darnaanta xaaladaada.



Caymiskee la ogolyahay?

Sadler Health Center way ogolaadaan Medicaid, Medicare iyo caymisyada ganacsiga ugu badan. Fadlan booqo websaydkeena wixii sharaxaado ah. Haddii Sadler Health Center aysan ku jirin shabakad shirkadaada caymiska, waxaad yeelan kartaa qarashaadka jeebka ka baxo oo sareeyo badelkii haddii aad aadi laheyd bixiyaha shabakada. Qaar ka mid ah caymisyada malahan faa'idooyinka shabakada jeebka laga bixiyo, oo waxaa nalaka rabi karaa inaan kuu soo dirno qarash buuxo. Qidmooyinka bukaanka waa la dhimi karaa haddii aad u qalantid Barnaamijka Dhimista Qidmada Buuxinta Baahiyada.

Ka waran haddii aan laheyn caymis?

Bukaanada waxaa lagu arki karaa Sadler Health Center iyaga oo leh ama aan laheyn caymis. Taqasuskeena Diiwaangelinta waxay kugu caawin karaan codsashada daboolida daryeelka caafimaad. Fadlan ka soo wac 717-960-4342 wixii su'aalo ah ee ku saabsan daboolida caymiska, si loo sahmiyo dooqyadaada oo daboolida, ama caawinta codsanayo.



Sidee ayaan u bixiyaa biilkeyga?

Lavag bixinta waxaa la joogaa waqtiga adeega. Waan ogolaanay kaashka, kaararka deynta iyo dalabyada lacagta. Bukaanada leh haraayada akoonka waxaa lagu dirayaa bayaanka.

Caawintee dhaqaalaha ayaa la heli karaa?

Waxaan siinaa Barnaamijka Dhimista Qidmada Buuxinta Baahiyada dhammaan bukaanada oo ku saleysan daqliga qoyska iyo cabirka. Dhaqaalaha waa inaan marnaba noqon caqabad loogu qalmayo daryeelka caafimaad! Wixii su'aalo ah ee barnaamijka, fadlan soo wac 717-960-4351 si aad ula hadashid wakiilka akoonka bukaanka.

Dooqyada qorshaha lacag bixinta sidoo kale waa la heli karaa. Wixii warbixin dheeraad ah, fadlan la xiriir Waaxda biilgareynta ee 717-960-4385.

Maxaa la ii weydiiyay inaan sheego daqliga qoyskeyga haddii aanan codsaneyn dhimis?

Sadler Health Center waa Xarun Caafimaad oo Faderaal ahaan U qalantay (FQHC) oo waa inay u hogaansanaataa sharuudaha wargelinta faderaalka. Heerarka daqliga ee bulshadeena bukaanka ah waa mid ka mid ah sheeyada an inaan soo wargelino. Warbixinta aan u gudbinay Illaha Caafimaad iyo Maamulaha Adeega (HRSA) wuxuu ku saleysanyahay bulshadeena bukaanka oo dhan, ma ahan warbixintaada shaqsiga ah. Waan fahamsannahay in tani ay tahay warbixin gaar ah oo aan caadi ahaan laga codsan bixiyaha daryeelka caafimaad oo ka mahadceliyo iskaashigaaga.



Miyaan codsadaa Barnaamijka Dhimista Qidmada Buuxinta Baahiyada?

Haa! Qof walba waa inuu codsadaa Barnaamijka Dhimista Qidmada Buuxinta Baahiyada, xittaa haddii aad leedahay caymiska caafimaad. Shaqsi walba iyo qoyska ah boqolkiiба 200% ama ka hooseeyo Jaheynada Saboolnimada Faderaalka waxay u qalmayaan mid ka mid ah heerarka shanteena dhimis.

Dhimista Qidmada Buuxinta Baahiyada waxay kugu caawineysaa daboolida dalacaadyada aan bixin caymiskaaga, laakin sidoo kale matalaa sida shabakada badbaadada haddii caymiskaaga si aan la filaneyn ku joogsado. Waxaad sidoo kale heli kartaa dhimista ka imaanayo hay'adaha kale ee banaanka oo sheybaarada iyo/ama qoraalada. Fadlan ka soo wac 717-960-4351 wixii warbixin dheeraad ah.

Sidee ayaan u codsadaa Barnaamijka Dhimista Qidmada Buuxinta Baahiyada?

Codsashada Barnaamijka Dhimista Qidmada Buuxinta Baahiyada way sahlantahay! Wuxaad ka heli kartaa codsiga midkood websaydkeena, ama adiga oo joogsanayo oo ka codsanayo mid soo dhaweeyaha xafiiska hore. Haddii aad su'aalo qabtid, caawin uga baahantahay dhameystirka codsigaaga, iyo wixii tallaabooyin dheeraad ah fadlan soo wac 717-960-4351.



Maxaan uga baahannahay inaan dhameystiro Codsiga Barnaamijka Dhimista Qidmada Buuxinta Baahiyada?

Cadeynta daqliga hadeer waxaa looga baahanyahay
Codsiga Barnaamijka Dhimista Qidmada Buuxinta
Baahiyada.

- | | |
|--|--|
| <input checked="" type="checkbox"/> Jeegaga ama warqad ka timid badroonigaaga (ee warqada hore), la taariiqeyay 30 kii maalmod ugu dambeysay | <input checked="" type="checkbox"/> Waraaqaha maxkamada, ama bayaanada bangiga ee muujinayo dabaajiyada canuga ama lacag bixinada garoobta |
| <input checked="" type="checkbox"/> Warqada magdhabida shaqada | <input checked="" type="checkbox"/> Waraaqaha illaha kale ee daqliga |
| <input checked="" type="checkbox"/> Warqada abaalmarinta ee SSI ama SSD (haddii ay quseyso) | <input checked="" type="checkbox"/> Haddii shaqada shaqsiga, oo aad dhawaan canshuurtay |

Waa maxay Bogga Bukaanka?

Bogga Bukaanka waa qaab onleen ah ee u ogolaado bukaanada inay ka eegaan qeybaha diiwaankooda caafimaad, codsiga dib u buuxinta iyo gudbinada, oo weydiyi su'aalo bixiyahooda.

Bogga wuxuu leeyahay dhaxgal, marka markii bukaan weydiyi su'aalo, bogga ayaa si toos ah ugu meeleyyo jadwalka bukaanka oo bixiyaha eego. Wuxaan u jawaabi karnaa bukaanka iyada oo si toos ah loogu dirayo jawaabteena dhinaca bogga. Si isku mid ah u aado gudbinada iyo buuxinada daawooyinka.

Sidee ayaan ku gali karaa Bogga Bukaanka?

Haddii aad leedahay akoonka Bogga Bukaanka mar hore kuu sameysan, fadlan booqo sadlerhealth.org oo gal akoonkaaga.

Haddii aadan laheyn akoon, soo wac 717-960-4393 si aad ula hadashid soo dhaweeiyaha.



Sidee ayaan ku helaa qoraalada daawada?

Wixii qoraalada daawada buuxinta, fadlan soo wac farmashigaaga oo weydii in codsiga buuxinta koronta ahaanta inaga naloo diraa.

Wixii codsiyada daawada cusub iyo isbadelada garoojada, fadlan la samey balan bixiyahaaga daryeelka caafimaadka.

Wixii buuxinada daawooyinka la xakameeyay (daawooyinka xanuunka, daawooyinka ADHD, iwm.), fadlan ka soo wac qadkeena qoraalka daawada buuxinta 717-960-4389 oo fariin ku reeb. Fadlan ku dar magacaaga, taariiqda dhalashada, daawada la codsaday, garoojada, lambarkaaga taleefonka, iyo magaca farmashiga.

Sidee ayaan ku helaa u gudbinta taqasus?

Haddii aad u baahantahay gudbin cusub oo taqasus ah, fadlan la sameyso balan bixiyahaaga daryeelka koowaad. Bixiyahaaga wuxuu u dirayaan codsiga gudbinta xiriiriyaheena gudbinta, kaas oo ku dirayo dhammaan diiwaanada muhiimka ah taqasus oo waxaan matalaadaada ugu balamineynaa balan. Xiriiriyaheena gudbinta ayaa ka dib kaala soo xiriiro karo warbixinta balanta.

Xiriiriya gudbinta ayaa sidoo kale daryeelayo sharuudaha caymis walba oo gudaha 30 maalmood ee balanta la jadwaleeyay.

Wixii cusbooneysiinta gudbinta, fadlan ka soo wac qadkeena gudbinta 717-960-4390 oo fariin ku reeb. Fadlan ku dar magacaaga, taariiqda dhalashada, lambarka taleefonka, halka laguugu arkay, iyo taariiqda balantaada.



Ka waran haddii aan u baahannahay baaritaanada sheybaarka?

Haddii bixiyaha daryeelka koowaad kuu tilmaamo inaad u timaatid shaqada sheybaarka, fadlan balanso balan sheybaarka ah. Haddii aad doorbidid inaad aadid sheybaar kale, fadlan ogeysii bixiyahaaga si markaas dalabkaaga sheybaarka laguugu daabaco si aad ugu qaadatid sheybaarka banaanka.

Haddii aad qabtid dalabka ka imaanayo bixiyaha xarun kale, fadlan u keen dalabkaaga shaqaalaheena sheybaarka si aad u eegtid ka hor inta aadan balansan balan. Tani waxay hubineysaa inaan awoodno sameyn ta dhammaan baaritaanada lagu dalbaday sheybaarkeena.

Ka waran haddii aan u baahdo Raajo?

Haddii aadan laheyn dalabka Raajada, fadlan soo wac 717-960-4393 si aad balan uga sameysatid bixiyahaaga daryeelka koowaad. Haddii aad leedahay dalab, fadlan ugeey dalabkaaga xarunta raajada si markaas Raajo loo sameeyo. Inta badan xarumaha raajada uma baahno balamo Raajooyinka ah.

Haddii bixiyahaaga amro kumbuyutarka CT, MRIs ama raajo kale, ha sameyn balantaada illaa shaqaalaha Sadler Health kula soo xiriiraan. Inta badan shirkadaha caymiska waxay u baahanyihii bixiyahaaga daryeelka koowaad inuu sameeyo ansixin hore ka hor inta aan baaritaanka la sameyn.

Shaqaalaha taageerada ayaa qaabilayo gudbinta codsiyada ansixinta hore. Markii codsi la ansixiyay ama la diiday, shaqaalaha taageerada ayaa kula soo xiriirayo. Haddii baaritaan la diido, caymiskaaga ma bixinayo baaritaanka oo waa inaad bixisaa qarashka jeebka haddii aad rabtid in baaritaanka la sameeyo. Haddii la ansixiyo, shaqaalaha taageerada waxay la xiriiriyaan xarunta raajada oo ay la jirto lambarka ansixinta hore iyo taariiqaha ay dhaceysoshaqaalaha taageerada ayaa sidoo kale kula soo xiriirayo si ay kuugu jadwaleeyaan balantaada.



Sidee ayaan u codsadaa diiwaanada caafimaadka?

Buuxi foomka Siideynta Diiwaanada Caafimaadkaa ee xafiiska hore. Waalidkamasuulka wuxuu codsan karaa diiwaanada caafimaad ee canuga ka hooseeyo 18 sanno. Wixii bukaanada ka weyn 18, bukaanka waa inuu codsadaa diiwaanada caafimaad illaa Sadler Health qorto warqada wakiilnimada qareenka.

Sadler Health ayaa si koronto ahaan ugu dirtaa oo u boostogareysaa diiwaanada caafimaadka xafiisyada dhaqaatiirta kale. Haddii bukaanka jeclaan lahaa in loo diro ama loogu qaado iyaga xafiiska oo sababahooda gaarka ah, waxaa jiro qidmo.

Diwiaanada waxaa lagu diraya 30 maal mood gudahood ee codsiga hore.

Qoraalada:



Sadler Health Center
100 N. Hanover Street
Carlisle, PA 17013

Xafiiska: (717) 218-6670
Fakis: (717) 218-6671

8:00 a.m. – 5:00 p.m.
Isniin, Tallaado, Jimcaha

9:00 a.m. – 5:00 p.m.
Arbacada

8:00 a.m. – 7:30 p.m.
Qamiis

Perry County – Dental
1104 Montour Road
Loysville, PA 17047

Xafiiska: (717) 960-4380
Fakis: (717) 960-4399

8:00 a.m. – 4:30 p.m.
Isniinta, Tallaadada, Qamiista, Jimcaha

9:30 a.m. – 4:30 p.m.
Arbacada

**Saacadaha waxay isku badeli karaan si
mudeysan. Fadlan ka fiiri websaydkeena
saacadaha hadeer ee howlgalka.**



SadlerHealth.org